# Xeerka Gudigga 4.30.050-P

# Ka hortaga Isdilka Ardayga

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay aqoonsanyihiin in is dilka uu yahay sababta ugu weyn ee dhimashada dhalinyarada iyo in xataa dhalinyaro badan ay tixgeliyaan oo isku dayaan inay is dilaan. Suurtagalnimada fikirka isdilka iyo is miidaaminta waxay u baahantahay taxadar feejignaan oo dhammaan shaqaalaha PPS. Xeerkaan waxaa looga baahanyahay sharciga Oregon, kaasoo la ansixiyay 2019 iyadoo laga jawaabayo u doodista qoyska ardayga hore ee PPS, Adi Staub, kaasoo loo aqoonsaday inuu yahay labeeb oo uu ku dhintay isdil 2017.

Sida natiijada ah, waa inaan uga qeybgalnaa dhaqamada ugu fiican oo lagu bixinayo xeeladaha ka hortaga iyo wax ka qabadka is dilka ee dugsigoo dhan si loo yareeyo fikradaha is dilka oo looga hortago isku dayada iyo dhimashooyinka. Waa inaan sidoo kale abuurnaa dugsiyo badqab iyo kobac leh oo kordhiyo xiriirada iyo dhiso arday xoogan oo is qiimeyso. Dadaaladaan waxay la socdaan qaab dhismeedka Sinnaanta Jinsiyada iyo Cadaalada Bulshada PPS iyo xarunta BIPOC (Madow, Dhalad, iyo Dadka Midibka) ardayda iyo LGBTQIA+ (soo gaabinta caanka ah ee laga roonada, laga roonaha, qaniis, nimoo-naag, labeeb, jinsi aan aheyn, laga roone, labo jinsi ah, aan labada jinsi aheyn, go'aansanayo jinsiga, iyo labada dheddig), ardayda la nool xanuunka damiirka iyo/ama isticmaalka maandooriyaha, kuwaasoo ku lug yeesha is waxyeelida ama isku dayay inay isdilaan, kuwaasoo ku nool meel ka baxsan guriga, oo la kulmaya guri la'aan, ay saameysay isdilka, iyo kuwa qaba xaalado caafimaad ama noocyo kala duwan oo naafonimo ah sababtoo ah ardaydaan waxay halis sare ugu jiraan inay isdilaan. Fayo qabka dareenka ardayda waxay si weyn u saameysaa ka qeybgalka dugsiga iyo guusha waxbarashada. Xeerkaan wuxuu ku saleysan yahay cilmi baaris iyo dhaqamada ugu fiican ee looga hortago isdilka oo waxaa lala qaatay fahamka ah in howlaha ka hortaga is dilka waxtarka leh ay hoos u dhigaan qatarta is dilka, oo kordhiso dhabeecada caawin raadinta, waxay aqoonsataa kuwa halista ugu jiro isdilka, oo waxay yareysaa dabeecadaha isdilka.

**Qorshaha Degmada ee Ka hortaga Isdilka**

Degmada waxay la kaashaneysaa qabiirada deegaanka iyo kuwa qaranka si loo abuuro oo loo joogteeyo qaab dhammeystiran oo wax looga qabanayo ka hortaga is dilka, wax ka qabadka, iyo wax ka qabadka soo kabsiga (xeelada ka hortaga dhibaatada ee loogu

tallogalay in lagu yareeyo qatarta is dilka iyo faafida is dilka, bixinta taageerada looga baahan yahay si looga caawiyo ka badbaadayaasha inay ka kabsadaan dhimashada isdilka, wax laga qabto ceebaha bulshada ee la xiriirta is dilka, iyo faafinta warbixinta dhabta ah ee dhimashada isdilka ee xubinta bulshada dugsiga). Degmada si joogto ah ayay dib ugu eegeysaa, u cusbooneysiineysaa, oo u hirgelineysaa qorshaha iyagoo la tashanaya qabiirada arinta mowduuca oo ay ka mid noqon karaan ururada ka hortaga isdilka deegaanka ama qaranka, Waaxda Waxbarashada Oregon (ODE), Xirfadlayaasha caafimaadka damiirka dugsiga ku saleysan, waaladiinta/masuulada, shaqaalaha, ardayda, maamulayaasha, iyo ururada guddiga dugsiga.

**Qorshaha Degmada e Distwaa inuu ku jiraa:**

1. **Tababar**

A. Dhammaan shaqaalaha PPS waxaa loo tababarayaa arrimaha qatarta ah iyo calaamadaha digniinta ee qatarta isdilka iyo xirfadaha loogu xiro ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha illaha gudaha iyo dibada ee dhismaha dugsiga. Qoraalada tababarka waa inay ku jiraan iqtiyaarada dib u eegida nafta.

B. Dhammaan shaqaalaha bulshada dugsiga, la taliyayaasha dugsiga, iyo cilmi nafsiilayaasha dugsiga, marka lagu daro shaqaale walboo dugsiga ah oo uu magacaabay maamulaha dhismaha, ayaa masuul ka noqonayo ka jawaabida iyo hirgelinta baaritaanka is dilka kadib markii qatar isdil ah la soo sheego, oo waa inay helaan tababar la xoojiyay oo habraacyada la xiriiro ka hortaga isdilka, wax ka qabadka, nidaamyada caafimaadka damiirka, iyo howlaha yareeyo qatarta oo sare u qaado bogsiimada isdilka kadib.

   a. Hormarinta xirfadlaha la xoojiyey ee shaqaalaha loo qoondeeyay waxaa ka mid noqonayo tababar lagu aqoonsanayo, lagu taageero, oo looga jawaabo kooxyo arday ah oo qatar sare ugu jiro isdilka, oo ay ku jiraan kuwa la nool cudurada damiirka iyo/ama isticmaalka maandooriyaha, kuwa ku lug yeesha is waxyeeleynta ama isku dayay inay isdilaan, kuwa ku sugan meelaha gudaha guriga ama ka baxsan, kuwa ay haysato guri la'aanta, ardayda Hindida Mareykanka ah/Dhaladka Alaska, ardayda LGBTQIA+, ardayda saameysay isdilka, iyo kuwa qaba xaalado caafimaad ama noocyada qaar ee

naafonimada.

b. Dhammaan shaqaalaha bulshada dugsiga, la taliyayaasha dugsiga, iyo cilmi nafsiilayaasha dugsiga, marka lagu daro shaqaalaha kale ee dugsiga ee uu magacaabay maamulaha dhismaha, waxaa lagu tababarayaa nidaamyada dib u gelida jawiga dugsiga kadib isbitaal jiifinta ama dhibaatada caafimaadka dabeecada1.

Qorshaha wuxuu uga baahanayaa in shaqaalaha Degmada ay ku dhaqmaan mar walba baaxada aqoonsiyada shaqsiga iyo shatiyada iyo inaysan gaarsiin adeegyo ama taageero markii aysan haysanin aqoonsiyada ama shatiga ay sidaas ku sameeyaan.

**2. Waxbarashada Ka hortaga Isdilka Dhalinyrada/Caafimaadka Damiirka ee loogu tallogalay Ardayda**

A. Dhammaan ardayda PPS waa inay helaan sannad walba barnaamijka ka hortaga cadeynta ku saleysan, ardayda xudun u ah kuwaasoo dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan ka jawaabaya oo hormar ahaana ku haboon. Barnaamijka ka hortaga isdilka waxaa ka mid noqonayo:

a. Muhiimada dooqyada badqab leh oo caafimaadan iyo xeeladaha ka soo kabsiga
b. Sida loo aqoonsado arrimaha qatarta ah iyo calaamadaha digniinta ee cudurada damiirka iyo isdilka shaqsiga iyo
c. Xeeladaha caawin raadinta shaqsiga ama dadka kale, oo ay ku jiraan sida looga qeybgalo illaha dugsiga oo saaxibadana caawin loogu soo gudbiyo. Intaas waxaa dheer, dugsiyada waxa laga yaabaa inay bixiyaan barnaamijka ka hortaga isdilka oo koox yar oo dheeraad ah ee loogu tallogalay ardayda.
d. Fursadaha ardayda ay ugu tababartaan xirfadaha ka hortaga isdilka.

B. Qoraalada ka hortaga isdilka iyo dooqyada manhajka waa inay dib u eegaan sannad walba koox badan oo edbin ah, oo ka kooban maamulayaal, waaladiin, macalimiin, xirfadlayaasha caafimaadka damiirka ee dugsiga u shaqeeya, wakiilo ka socda adeegyada ka

hortaga isdilka bulshada, iyo shaqsiyaadka kale ee qibrad u leh caafimaadka damiirka dhalinyarada, hoos yimaada maamulka ee xubin ka tirsan shaqaalaha ka hortaga Degmada.

Dib u eegisyadaan waa inay ku jiraan xogta sahannada oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidneyn Sahanka Habdhaqanka Qatarta Dhallinyarada Qaranka iyo Sahanka Dugsiyada Guuleysta ee PPS.

**3. Shuruudaha ah in Dugsi Walba uu Leeyahay Qorshahooda Ka hortaga Isdilka**

A. Qorshooyinka ka hortaga isdilka dugsiga ku saleysan waa inuu ku jiraa laakiin aan ku xadidneyn qeybaha soo socda:

- Hal meel xiriir ah ama ka badan oo ka hortaga isdilka
- Tababarka shaqaalaha qorsheysan ee ku saabsan ka hortaga is dilka
- Waxbarashada caafimaadka iyo fayo qabka ardayga ee la qorsheeyay, manhajka ka hortaga isdilka, iyo barashada dareenka bulshada
- Fursadaha ardayda si ay u dareemaan in la arkay, la maqlay, oo la qiimeeyo inta lagu jiro hormarinta jinsiyada, dhaqanka, iyo/ama kooxaha kale ee aqoonsiga
- Illaha dugsiga ku saleysan ee qeexan iyo nidaamyada gudbinta si loo taageero ardayda wajaheyso heerka dokumentiga, guriyeynta iyo cunto yarida, daryeelka caafimaadka, iyo walaacyada kale ee kordhiya qatarta isdilka
- Nidaamka loogu tallogalay raadraaca baaritaanada isdilka dugsiga gaarka u ah iyo dgubinada iyo
- Tababarka xubnaha shaqaalaha gaarka ah ee dugsiga ee taageerooyinka wax ka qabashada soo kabsiga oo ay ku jiraan la xiriirida Waaxda Guusha iyo Caafimaadka Ardayga kadib dhimashada isdilka ee barnaamijka dugsigaaga.

**4. Raadraacida iyo La xisaabtanka**

A. Waaxda Guusha iyo Caafimaadka Ardayda Degmada waxay:
   a. Noqoneysaa xafiiska diiwaanka ee baaritaanada isdilka oo bixiyo la tashi
   b. Diyaariyaan tababarka sannadlaha ee shaqaalaha ka hortaga isdilka
   c. Aqoonso oo taageer meesha xiriirka ka hortaga isdilka oo barnaamijka

dugsi walba

d. Joogteynayaan liiska manhajka/qorshaha ka hortaga is dilka ee dugsi walboo PPS ah iyadoo la adeegsanayo goobta lagala xiriiro is dilida
e. Bixiyaan jawaabta dhibaatada iyo dhaqamada ugu fiican ee taageerooyinka soo kabsiga wax ka qabadka soo kabsiga ee dugsiyada la kulmayo isdilka

**5. Ogeysiinta iyo Waxbarashada/Ka qeybgelinta Qoyska**

Dhammaan ardayda, qoysaska, shaqaalaha, iyo qandaraaslayaasha iyo tabarucayaasha siiyo adeegyo ardayda waxaa la ogeysiin doonaa sannad walba xeerkaan, hab dhaqamada ugu fiican ee ka hortaga isdilka ee qoysaska, wadooyinka loo maro dooda aan rasmiga aheyn ee walaacyada ku saabsan falalka la xiriiro is dilka.

qatarta, iyo sidoo kale sida nidaamka dib u eegida falalka lagu qaado ka jawaabida qatarta isdilka.

1 "Dhibaatada caafimaadka dabeecada" sida lagu qeexay Sharciga Maamulka Oregon (OAR) 581-022-2510, waxaa loola jeedaa qalqalka damiirka shaqsi ama xaliloonida dareenka ama shaqeynta taasoo sababto baahida degdega ah ee daaweyn degdeg ah si looga hortago inay si xun uga sii darto caafimaadka damiirka iyo jirka shaqsiga R5/01/20│PH Ka hortaga Isdilka Ardayga** – JHH 1-2

DHAMMAADKA
XEERKA

Tixraac(a/yada)
Sharciga:

ORS 332.107 ORS 339.343 OAR 581-022-2510

OSBA: JHH

Waxaa la qaatay 1/2021